

NABAD GELYADA GURIGA & BADBAADADA DABKA

Fact Sheet 22 – Community Risk Management. Revised 28/09/2004 – Somali

- NSW FIRE BRIGADES
- NSW RURAL FIRE SERVICE
- ACT FIRE BRIGADE
- ACT RURAL FIRE SERVICE

XAQIIQADA

Sannad kasta NSW degaano badan ayaa la kulma dhibaato ay kaga cararayaan dab ka dhasha guryahooda is badbaadin awgeed waxaana dhici karta inay dhintaan dib looga dhacay awgeed. Waxaanu ku talinaynaa isu miisaamida nabadgelyada iyo badbaadada guriga. Waa muhiim inaad ka qufusho tuugga, haddii uu dab dhaco, waxa muhiim ah inaad adiga iyo qoyskaaga midna isku qufulin.

~~Talaabo kasta oo nabadgelyo oo aad doorato dhinaca gurigaaga waxaanu kugula talinaynaa inaad taxdir dheeraad ah samaysid markaad qiyaasayso heerka halista tuugga markaas waa inaad samaysataa qorshaha ka sbato baxa badbaadsan adiga iyo qoyskaagu.~~

Qiyaasta nabad gelyo ee saamayn ku yeelan karta ka sabota baxa dabka waxa ka mid ah:

- Qufulada /ama qufulada kala duwnan ee albaabka dusha lagaga xiro.
- Biraha iyo garaa'idka lagu xiro daaqadaha ama albaabka badbaadada.
- Qufulada daaqadaha ama qalbka wareegga ee daaqadaha lagu xiro

Qiyaasta badbaadada guriga waxa ka mid ah INAAD samayso:

- Guri kasta ama qeyb guri kastaa waa inay yeelataa lambar la ansixiyey (AS3786) ee alaamka qiiqa oo la tijaabiyey si joogto ah.
- Waa inuu ku xiranyahay alaam qeyb kasta oo ka mid ah gurigaaga.
- Waa inay jiraan labo meelood oo badbaadsani qolkasta – xusuuso, il bidhiqsi kasta wuu tirsanyahay
- Ku sawiro qorshaha saboto bixintaada warqada kanala hadal qoyskaaga.
- Hubi in daaqad iyo albaab kasta si degdeg ah loo furi karo marka loo baahdo.
- Hubi in furayaasha albaabada oo dhami ay meel dhow ku diyaar yihiin.
- Haddii aad curyaan tahay ama qof gaboobay oo itaal daran waxay si weynu saamaynaysaa fursadaada nabadeed haddii uu si nasiib daro ah guriga dab u qabsado.

Maxaad kale ee aad samaynaysaa si aad gurigaaga dabka ugga badbaadisid?

- Dadka hurdada dheer sida caruurta ama kuwa khamrada iyo daroogada isticmaala ee aan ku kici Karin codka alaamka . hubi in qorshahani ka mid yahay qorshaha saboto bixinta hubi in uu qorshahani saamynayo qorshaha ka sabotobixida guriga.
- Ka eeg xaashiyaha xaqqiida wixii macluumaad dheeraad ah ee badbaadinta dabka.

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH LA XIRIIR XARUNTA DABDAMISKA AMA ILAALINTA DABKA
DEGMADAADA AMA FIIRI WEBSITEKA**

www.fire.nsw.gov.au www.rfs.nsw.goc.au ama www.esa.act.gov.au

TILMAAMAHA BADBAADADA DABKA

- Xusuusnow in qiiqa dabka ka soo baxa aad ku jaah wareeri karto oo aanad arki Karin qiiqa.
- Haddi aad ka baxsato dabka guriga, xusuusnow marka aad debada joogsatid inaad tilifoonisid lambarka 000
- U ogolow caruurta qorsha ka saboto bixida dabka waan in isku dayo la sameeyaa ka hor intaan la sameyn qorshaha ka saboto bixinta
- Haddii uu qof ka mid ah qoysku uu leeyahay dhibaato dhego cuslaan iyo socod hubi inaad taas qorshaha ku darsato haddii ay muhiim tahay in qof caawiyo loo sameeyo.
- Qorshaha badbaadada gurigu waa u muhiim qoyska oo dhan is diyaarintuna waxay ka hortagi kartaa masiiba.

WIXII ARRIN DEGDEG AH TILIFOONI 000